**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**MAXKAMADDA SARE EE FEDERAALKA**

**QAYBTA DOORASHADA**

**MAGACA DADWEYNAHA SOOMAALIYEED**

# XUKUN

SUM: MSF/DD/1/2026 Tr. 24/08/2026

SUM: MSF/DD/BX/ 1 /2026

Maxkamadda Sare ee Federaalka oo ka kooban:

1. Baashe Yuusuf Axmed — Guddoomiye
2. Saalax Sh. Ibraahim Dhiblaawe — Garsoore
3. Cabdulxaq Cumar Maxamed — Garsoore
4. Cabdulcasiis Maxamed Yuusuf — Garsoore
5. Xaydar Barqash Abiikar — Garsoore

Oo uu kaalinayo Maxamed Faarax Jimcaale, waxa ay 17, 18 iyo 19 Agoosto 2026 u fadhiisatay garmaqalka duridda doorashooyinka ee galka sumaddiisu tahay MSF/DD/1/2026, taas oo u dhaxaysa dhinacyada hoos ku xusan:

## A. DHINACYADA

1) **Urur Siyaasadeedka Dib-u-heshiisiinta iyo Horumarinta Towfiiq (Ururka), Qareenno: Sakariye Ismaaciil Nuur, Cali Xalane, Xasan Maxamed Muuse, Sadiiq Aadan Cali, Xuseen Cabdi Yuusuf, Xabiib Cali Jaamac, Maxamed Xasan Cusmaan iyo Cabdullaahi Macallin Muxyidiin — DURE**

**LID**

2) **Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha (Guddiga), Qareenno: Cabdiqaadir Cusmaan Cabdisalaan iyo Cabdinuur Maxamed Yuusuf — LADURE**

## B. HORDHAC

1. Guddiga ayaa soo saaray 02/07/2026, jadwalka doorashooyinka isku-sidkan ee golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka ee dowlad goboleedka Galmudug. Guddigu waxa uu jadwalka ku asteeyay taariikhda shaacinta liisaska kumeelgaarka iyo kan kamadambaysta ah ee codbixiyeyaasha, soo gudbinta liiska murashixiinta, iyo xallinta cabashooyinka la xidhiidha liiska, kaddibna shaacintiisa, astaynta iyo shaacinta goobaha codbixinta, diiwaangelinta/qaybtinta kaararka codbixiyeyaasha iyo ugu dambeyn maalinta codbixinta oo uu u asteeyay 20/07/2026.
2. Guddigu waxa uu soo saaray 05/07/2026, go'aan uu wax uga beddelay jadwalkii 1aad ee uu ku asteeyay taariikhda qabsoomidda doorashooyinka, isaga oo ka dhigay taariikhda qabsoomidda doorashooyinka 25/07/2026.
3. Guddigu waxa uu shaaciyay 20/07/2026, goobaha codbixinta doorashooyinka Galmudug.
4. Guddigu waxa uu soo saaray 21/07/2026, go'aan uu wax uga beddelay jadwalkii 2aad ee uu ku asteeyay taariikhda qabsoomidda doorashooyinka, isaga oo ka dhigay taariikhda qabsoomidda doorashooyinka 30/07/2026.
5. Guddigu waxa uu soo saaray 08/07/2026, liiska rasmiga ah ee ururrada siyaasadda ee ku tartamaya doorashooyinka isku-sidkan ee dowlad goboleedka Galmudug.
6. Dowlad Goboleedka Galmudug waxaa ka qabsoontay 30/07/2026 doorashooyinka isku-sidkan ee golaha wakiilladda iyo goleyaasha deegaanka.
7. Guddigu waxa uu ku dhawaaqay 03/08/2026, natiijada kumeelgaarka ah ee doorashooyinka isku-sidkan ee golaha wakiilladda iyo goleyaasha deegaanka ee Galmudug.
8. Guddigu waxa uu Maxkamadda Sare ee Federaalka u soo gudbiyay 05/08/2026, natiijada doorashooyinka Galmudug, si Maxkamaddu waajibkeeda sharci uga gudato.
9. Urur Siyaasadeedka Dib-u-heshiisiinta iyo Horumarinta Towfiiq ayaa 10/08/2026, Maxkamadda Sare ee Federaalka u soo gudbiyay arjiga duridda natiijada doorashooyinka isku-sidkan ee golaha wakiilladda iyo goleyaasha deegaanka ee Galmudug, arjigaas oo ay sumaddiisu tahay

XQH/42/2026, kuna taariikhaysan 08/08/2026, kaas oo ay ku durayaan saxnimada iyo sharcinimada natiijada doorashooyinka Galmudug.

10. Guddiga ayaa Maxkamadda u soo gudbiyay 12/08/2026, arjiga is-hortaagga sumaddiisu tahay SLWB/HOM/27/2026, kuna taariikhaysan 12/08/2026, kaas oo ay ku diidan yihiin sharcinimada duridda Ururka.
11. Maxkamadda Sare ee Federaalka ayaa dhageysiga duridda u fariisatay 17kii ilaa 19kii Agoosto 2026, iyada oo ay dhinacyadu ahaayeen goobjoog.
12. Maxkamaddu fadhigeedii koowaad ee qabsoomay 17/08/2026 waxa ay ku dhagaysatay asbaabta is-hortaagga Guddiga iyo jawaabcelinta Ururka.

## C. DHAGEYSIGA IYO GO'AANKA IS-HORTAAGGA

13. Nuxurka is-hortaagga Laduraha ayaa ahaa: 1. In duridda ay ka dhacday muddadii sharciga ahayd, sidaas darteedna aan la aqbalin. 2. In duriddu aysan lahayn wax ujeeddo ah oo cad oo ay ku saabsan tahay, taasina ay ka dhigayso mid aan xadidin nooca duriddu ku saabsan tahay. 3. In qareennada gadaal ka keenay raacsiinta ay ka dhacday muddadii duridda.
14. Nuxurka jawaabta is-hortaagga ee Duraha ayaa ahayd: 1. In duridda ay ku soo gudbiyeen muddadii sharciga ahayd maadaama todobada maalin ay tahay maalmo shaqo sida ku cad habraaca ansixinta natiijada iyo ka garnaqidda duridda doorashooyinka, iyo in xisaabinta muddadu ay ka billaabanayso maalinta xigtay ku dhawaaqidda sida ku cad qodobka 110aad ee Xeerka Habka Madaniga.
15. Maxkamaddu waxa ay diiday is-hortaagga uu Guddigu soo gudbiyay, waxa ayna go'aamisay in la gudagalo dhageysiga dulucda duridda, iyada oo go'aankeeda ku sababaysay:
    i. In muddada duridda ee sharciga ku xusan ay ka billaabanayso maalinta xigta tallaabada laga cabanayo si waafaqsan qodobka 110aad Xeerka Habka Madaniga, iyo in todobada maalin ay tahay maalmo shaqo sida maxkamadda sare ee federaalka ay ku fasirtay habraaceeda ansixinta natiijada iyo ka garnaqidda duridda doorashooyinka, qodobkiisa 19aad, fasiraadddaas oo waafaqsan awooddeeda ku xusan qodobka 130aad ee dastuurka, sidaas darteedna duridda lagu soo gudbiyay si waafaqsan muddada sharciga ah.
    ii. In duriddu leedahay ujeeddo cad, taas oo ah in ay lid ku tahay natiijada doorashooyinka isku-sidkan ee golaha wakiilada iyo

goleyaasha deegaanka ee dowlad goboleedka Galmudug, taas oo qabsoontay 30kii Luulyo 2026.

iii. In muddada todobada maalin ah ee ku xusan sharciga doorashooyinku ay ku saabsan tahay soo gudbinta druid doorasho balse aysan khuseynin raacsiin iyo qareen ku soo biira duridda markii la gudbiyay ka gadaal.

## D. NUXURKA ASBAABTA DOODDA DURAHA

**Duruhu waxa uu ku dooday:**

16. In duriddoodu lid ku tahay go'aanka kama-dambaysta ah ee Guddiga ee natiijada doorashooyinkii isku-sidkanaa ee Golaha Wakiillada iyo Goleyaasha Deegaanka Galmudug ee lagu dhawaaqay 03/07/2026, si waafaqsan Qodobka 73aad faqraddiisa 2aad ee Sharciga Doorashooyinka Lr. 28 iyo Habraaca Maxkamadda Sare ee Federaalka ee ansixinta natiijada iyo ka-garnaqidda duridda doorashooyinka ee 28/08/2026.
17. In dulucda iyo nuxurka duriddu ku saabsan tahay xadgudubyo dastuur, sharci, xeer-hoosaad, xeer-nidaamiye iyo hageyaal ah oo Guddigu ku kacay xilligii ay socotay doorashadii isku-sidkanayd ee Golaha Wakiillada iyo Goleyaasha Deegaanka Galmudug.
18. In Guddigu ku kacay falal iyo tallaabooyin xadgudub ku ah Dastuurka JFS. Duruhu waxa uu ku dooday in falalkaasi ay taabanayaan mabaadi'da aasaasiga ah ee Qodobka 47aad ee Dastuurku dhigay, gaar ahaan in doorashooyinku noqdaan kuwo xor iyo caddaalad ah, dammaanad qaadaya xuquuqda siyaasadeed ee muwaadiniinta, si daahfuran oo isla-xisaabtan lehna loo maareeyo loona korjoogteeyo.
19. In natiijadda doorashada Dowlad Goboleedka Galmudug ee Guddigu shaaciyay ay ka dhalatay doorasho aan u dhicin, loona qaban si xor iyo xalaal ah, caddaalad ah, dhexdhexaadnimo ku jirto, islamarkaana ka maran takoor, musuqmaasuq, eex iyo farogelin.
20. In Guddigu jabiyay Qodobka 51aad faqradihiisa 2aad iyo 3aad ee Dastuurka, kuwaas oo muwaadiniinta diiwaangashan u dammaanad qaadaya xaqa ay u leeyihiin in ay codkooda u dhiibtaan si xor ah. duruhu waxa uu ku dooday in muwaadiniin xaq u lahaa in ay codeeyaan laga hor-istaagay, halka qaar kalena lagu qasbay in aanay rabitaankooda ku codeyn ee loo yeeriyay ururka ay u codaynayaan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
MAXKAMADDA SARE EE DALKA
SUPREME COURT

21. In Guddigu ku xadgudbay Qodobka 52aad ee Dastuurka. Wuxuu sheegay in meesha laga saaray doorkii ururrada siyaasaddu ku lahaayeen doorashada. Si gaar ah, wuxuu ku dooday in Ururka Towfiiq goobo badan laga hor-istaagay in uu wakiillo gaysto, wakiilladii goobaha codbixintana laga saaray, qaarkood la xiray, qaar kalena dhibaato jireed loo geystay, iyada oo Ururka loo arkayay ururka keliya ee la tartami kara urur kale oo Duruhu u arko in Guddigu u xaglinayay.
22. In Guddigu baalmaray Qodobka 18aad faqraddiisa 1aad ee Sharciga Doorashooyinka. Qodobkani waxa uu waajibinayaa in Guddigu cayimo maalinta doorashada Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka iyo Goleyaasha Deegaanka ugu yaraan 90 maalmood ka hor maalinta doorashada. Taas beddelkeeda, Duruhu waxa uu ku dooday in dhammaan geeddi-socodkii doorashada isku-sidkan ee Galmudug, oo ay ku jiraan diiwaangelinta codbixiyaha, soo saarista liiska ku-meel-gaarka ah ee codbixiyeyaasha iyo shaacinta liiska kama-dambaysta ah ee codbixiyeyaasha, lagu soo koobay 28 maalmood, taas oo toos uga hor imanaysa axkaamta qodobkan.
23. In aanu Guddigu dabaqin Qodobka 34aad ee sharciga doorashooyinka oo uu si cad u jabiyay. Qodobkani wuxuu Guddiga ku waajibinayaa soo saarista liiska ku-meel-gaarka ah ee codbiyeyaasha, oo ay tahay in marka diiwaangelintu dhammaato 2 bilood gudahood lagu soo saaro, iyo liiska kama-dambaysta ah ee codbixiyeyaasha, oo qodobkani waajibinayo in ugu yaraan 30 maalmood ka hor doorashada la soo saaro, sidaas oo kalena lala wadaago ururrada siyaasadda iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Duruhu waxa uu ku dooday in aan gabi ahaanba tallaabooyinkan la qaadin. Wuxuu sheegay in aanu jirin liis la soo saaray ama lala wadaagay hay'adaha sharcigu sheegay, balse keliya la sheegay in la shaacinayo liiska ku-meel-gaarka ah iyo midka kama-dambaysta ah iyada oo maalinta doorashada ay ka hadhay maalmo kooban.
24. In Guddigu jabiyay Qodobka 42aad faqraddiisa 1aad ee sharciga doorashooyinka. Wuxuu sheegay in qodobkani waajib ka dhigayo in ururrada siyaasaddu Guddiga u soo gudbiyaan liiska murashixiinta doorashada uga qaybgalaya ugu yaraan 120 maalmood oo shaqo ka hor maalinta doorashada. Gudbinta kaddib, Guddigu waa inuu hubiyaa buuxinta shuruudaha murashixiinta, hubin iyo sixitaan kaddibna shaaciyaa liiska rasmiga ah ee murashixiinta doorashada u tartamaya ayuu duruhu ku dooday. Waxa uu sheegay in ururkii ugu horreeyay uu

liiska murashixiintiisa gudbiyay 5 maalmood ka hor doorashada, Guddiguna aanu gebi ahaanba si rasmi ah u shaacin liiska murashixiinta doorashada ku tartamay.

25. In aan la dabaqin Qodobka 45aad faqraddiisa 2aad ee sharciga doorashooyinka. Wuxuu sheegay in qodobkani waajibinayo in ololaha doorashadu bilaabmo 45 maalmood ka hor maalinta codbixinta, lana joojiyo 48 saacadood ka hor bilowga codbixinta. Duruhu wuxuu sheegay in aan fursaddan la siin ururrada, taas beddelkeedana geeddi-socodka doorashada oo dhan, oo ay ku jirto diiwaangelintu, lagu soo koobay 28 maalmood.
26. In la jabiyay Qodobka 47aad sharciga doorashooyinka, oo garsoorka, saraakiisa amniga, shaqaalaha dowladda iyo diblomaasiiyinta ka reebaya ka qaybgalka ololaha doorashada. Wuxuu sheegay in xubno ka tirsan kuwa sharcigu ka reebay ka qaybgalka ololaha doorashadu ay si toos ah urur gaar ugu ololeeyeen xilligii doorashada.
27. In Guddigu ka baydhay waajibkii dhexdhexaadnimo ee uu faray Qodobka 4aad ee Sharciga lagu dhisay Guddiga, Sharci Lr. 26 ee Diisember 2024. Wuxuu sheegay in aanu Guddigu si dhexdhexaad ah u hirgelin hawlaha doorashada, balse uu ururka talada haya si gaar ah ugu xagliyay, taas oo uu sheegay in ay dhaawacday hufnaantii iyo xalaalnimadii doorashada.
28. In maalintii codbixinta ay dhaceen khaladaad farsamo, kuwo sharci iyo xadgudubyo badan oo ka dhacay goobaha codbixinta, kuwaas oo keenay in lagu kalsoonaan waayo natiijada, isla markaana dhaawacay hufnaanta, daahfurnaanta, xornimada iyo xalaalnimada doorashada.
29. In aan ku dhawaaqista natiijada aan sharciga loo raacin. Wuxuu sheegay in, si waafaqsan Qodobka 70aad faqraddiisa 4aad, ay Guddiga waajib ku tahay in ay ku dhawaaqaan natiijo dhammaystiran oo ay ku cad yihiin tirada iyo magacyada xildhibaannada Golaha Wakiillada iyo Goleyaasha Deegaanka ee urur kastaa ku guulaystay, iyada oo la raacayo sida ay ugu kala horreeyaan liiska murashixiinta. Taas beddelkeeda, waxa uu sheegay in Guddigu ku dhawaaqay keliya tirada kuraasta ururradu kala heleen, iyada oo aan la aqoon dadka kuraastaas ku guulaystay.
30. In uu qaar ka mid ah goobaha codbixinta loo diiday in ay wakiillo geystaan, qaarna wakiilladii laga saaray; in xubno wakiillo ah la xiray ama dhibaato jireed loo geystay; in cod lagu shubtay; in warqado aan

rasmi ahayn lagu codeeyay; in meelo aan loo qorshayn sanaadiiq la geeyay; in qaar ka mid ah sanaadiiqdii lagu codeeyay ay laba maalmood goobihii codbixinta ku sii jireen; in loo diiday gudbinta cabashooyinka; in aan si habboon loogu dhawaaqin loona dhajin warqadda natiijada goobta; iyo in raridda agabka aan loo oggolaan in wakiilladu raacaan. Waxa uu ku dooday in dhammaan qodobbada nidaaminaya habraaca bilowga codbixinta ilaa soo saarista natiijada lagu gefay, taasina ay dhalisay natiijada muranku ka taagan yahay.

31. In si waafaqsan Qodobka 82aad ee Sharciga Doorashooyinka, doorashada Golaha Wakiillada iyo Goleyaasha Deegaanka Galmudug ay tahay mid aan sax iyo sharci ahayn oo waxba kama jiraan ah. Wuxuu ku doodday in qodobkani si aan mugdi ku jirin u caddeeyay in ay waajib tahay in dhammaan doorashooyinka loo qabto si waafaqsan Dastuurka, Sharciga Doorashooyinka, Sharciga Guddiga lagu dhisay iyo Sharciga Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda, isla markaana doorasho kasta oo aan sidaas loo qaban ay waxba kama jiraan tahay.

32. Duruhu waxa uu soo bandhigay caddaymo isugu jira sawirro, fiidyowyo, codad iyo markhaatiyaal si uu ugu caddeeyo sheegashooyinka uu ku duray saxnaanta iyo sharcinimada doorashada Golaha Wakiillada iyo Goleyaasha Deegaanka Galmudug.

33. Ugu dambayn, Duruhu waxa uu Maxkamaddan ka codsaday in ay:

i. Aqbasho duridda Ururka shakli iyo duluc ahaanba;

ii. Laasho natiijada doorashada Golaha Wakiillada iyo Goleyaasha Deegaanka Dowlad Goboleedka Galmudug maadaama aan loo qaban si waafaqsan sharciga;

iii. Amarto qabashada doorasho cusub taas oo ay korjoogtaynayaan goob-joogeyaal caalami ah iyo kuwo maxali ahi;

iv. Ku xukunto Guddiga magdhow dhan **$2,862,350** (Labo Milyan, Siddeed Boqol, Lixdan iyo Labo Kun, Saddex Boqol iyo Konton Doolarka Maraykanka);

v. Ku xukunto kharashka dacwadda iyo xushmadda qareenka oo dhan **$328,500** (Saddex Boqol, Labaatan iyo Sideed Kun iyo Shan Boqol oo Doolarka Maraykanka ah).



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية
المحكمة العليا
SUPREME COURT

## E. NUXURKA DOODDA JAWAABCELINTA LADURAHA

**Laduruhu waxa uu ku dooday:**

34. In uu qabtay doorasho taariikhi ah, xor iyo xalaal ah, sharcigana waafaqsan. Wuxuu sheegay in dadka reer Galmudug ay 50 sano ka badan kaddib markii ugu horraysay heleen fursad ay ku doortaan cidda metalaysa.
35. In ay doorashada saldhig u ahayd, mabaad'ida dastuurka, abaabulkeeda iyo qabashadeedana loo raacay sharciga doorashooyinka, xilkiisa dastuuriga ahna u gutay si hufan.
36. In uu si buuxda ugu hoggaansamay Qodobka $18^{aad}$ faqraddiisa $3^{aad}$ ee Sharciga Doorashooyinka, isaga oo maalinta doorashada Galmudug dhacayso cayimay bishii Febraayo 2026. Waxa uu caddayn ahaan u soo bandhigay qoraal guud oo soo baxay 23/02/2026, kaas oo lagu sheegay in ururrada siyaasadu u diyaar garoobaan soo gudbinta liiska murashixiinta iyo ololaha doorashada.
37. In uu si buuxda u waafaqay Qodobka $34^{aad}$ ee Sharciga Doorashada. Waxa uu sheegay in liiska kama-dambaysta ah ee codbixiyeyaasha la soo saaray bil ka hor maalinta codbixinta iyo in lala wadaagay dhammaan ururrada siyaasadda iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Waxa uu caddayn ahaan Maxkamadda ugu soo gudbiyay warqadda ku taariikhaysan 28/06/2026, taas oo Wasaaradda lagu wargelinayo in loo gudbiyay xogta guud ee codbixiyeyaasha.
38. In Qodobada $34^{aad}$ iyo $42^{aad}$ ee sharciga doorashooyinku ay is khilaafsan yihiin, oo aan qodobka $42^{aad}$ la dabaqi karin. Waxa uu sheegay in shardi sharci ah tahay in qofka murashaxa noqonayaa uu yahay qof codbixiye isku diiwaangeliyay, diiwaangelintana la qabtay iyada oo doorashada ay ka hadhay muddo 120 maalmood ka yar, sidaas darteed iyada oo aan codbixiyeyaasha la diiwaangelin aanay suurtogal ah ahayn soo gudbinta murashixiinta. Waxa uu sheegay, si uu guddigu u xalliyo is khilaafka sharci ee jira in ay soo saareen xeer-nidaamiye arrinta lagu xallinayo, kaas oo meesha ka saaraya muddada 120 maalmood ah gudbinta murashixiinta.
39. In uu urarrada siyaasadda siisay wakhti ku filan oo ay ololaha doorashada ku samayn karaan. Waxa uu ku dooday in ugu yaraan 7 bilood ka hor la cayimay xilliga doorashada la qabanayo, muddada intaas le'egna ay haysteen. Guddigu, wuxuu sheegay in uu 48 saacadood ka hor

maalinta codbixinta, soo saaray wargelin uu ku joojinayo ololaha maadaama sharcigu waajibiyay in 48 saacadood bilawga codbixinta ka hor la joojiyo ololaha doorashada. Taas uu guddigu sheegay in ay caddeyn u tahay in ururaddu heleen wakhti ay ku ololeeyaan.

40. Arrinta la xiriirta dadka ololaha ka reebban ee lagu qeexay Qodobka 47aad ee Sharciga Doorashooyinka, taas oo Duruhu ku doodday in la jabiyay, ayuu Guddigu deedafeeyay, waxa uu sheegay in iyaga ogaalkooda aanay jirin cid sharcigu ka reebay ka qaybqaadashada ololaha oo ka qaybgashay ama cid gaar ah u ololaysay.
41. In uu xilkiisa iyo waajibaadkiisa u gutay si dhexdhexaadnimo, hufnaan iyo caddaalad ku jirto, isaga oo u hoggaansamaya waajibaadka sharci ee ay saareen Qodobada 4aad iyo 10aad ee Sharciga Guddiga lagu dhisay, kuwaas oo dhinaca kale sheegay in la baalmaray.
42. Laduruhu waxa uu deedafeeyay doodda dhinaca kale ee la xiriirta qaladaadka farsamo iyo sharci ee lagu eedeeyay in guddigu ku kacay maalintii doorashada. Waxa uu ku sheegay in ay jireen meelo kooban oo ay wax ka dhaceen, sida hal goob oo arrimo amni darteed sanaadiiqda codbixintu wakhtigii loogu talogalay kaddib laga qaaday iyo hal goob oo loo qorsheeyay in laga codeeyo balse arrimo farsamo darteed aan laga coddeyn. Arrintaas, ayay ku sheegeen kuwa kooban oo aan wax u dhimmayn hufnaanta, xor iyo xalaalnimada iyo natiijadda doorashada.
43. In tirinta codadka goobta markii la dhammaystiray si waafaqsan Qodobka 62aad ee sharciga doorashooyinka loogu dhawaaqay, warqadda natiijadana lagu dhajiyay dhammaan goobaha codbixinta. Gudbinta natiijadda goobta ayuu iyana sheegay in si sharciga waafaqsan loo gudbiyay.
44. In aanu dadka kuraasta ku guulaystay iclaamin karin ka hor ansixinta natiijada ee Maxkamadda Sare. Arrintan waxa uu ku sababeeyay in ay jiraan ururro, Towfiiq ka mid yahay, oo aan weli soo gudbin liiska doorashada ku guulaystay.
45. Laduruhu waxa uu deedafeeyay caddaymaha dhinaca kale soo bandhigay. Dhammaan sawiradda, fiidyowyada iyo codadka ayay ku sheegeen kuwo aan caddeyn ahaan loo cuskan karin, maadaama aan la xaqiijin karin run ahaantooda, sida cidda duubtay ama sawirtay, goobta iyo taariikhada la duubay ama la sawiray.
46. Laduruhu waxa kale oo uu deedafeeyay dhammaan maragyada uu dhinaca kale markhaati ahaan Maxkamadda u horkeenay. Waxa uu ku

dooday in dhammaan dadka maragyada loo keenay ay ka tirsan yihiin Ururka, sidaas darteed, aanay iyagu wada noqon karin dacwoode iyo markhaati. Sidaas oo kale, waxa uu ku dooday in haddiiba maragooda la aqbalo, ay adag tahay in la xaqiijiyo xogta ay sheegeen. Balse, Guddigu waxa uu xaqiijiyay qayb kooban oo ka mid ah xogta maragyadu sheegeen, sida sanaadiiqda goobta codbixinta looga tagay iyo goob codbixin oo ay ahayd in laga codeeyo balse aan laga codeyn, iyada oo Guddigu sheegay in dadkii ka codeyn lahaa goobo kale loo wareejiyay.

47. Gebogebaddii Guddigu waxa uu Maxkamaddan ka codsaday in ay:

i. Diiddo arjiga duridda dhinaca kale;
ii. Aqbasho arjiga jawaabcelinta guddiga iyo dhammaan caddaymaha uu soo gudbiyay;
iii. Diiddo, meeshana ka saarto dhammaan dalabyada dhinaca kale maadaama aanay qodobo sharci ku dhisnayn;
iv. Ansixiso natiijadda kama-dambaysta ah ee doorashooyinka Golaha Wakiilladda iyo Goleyaasha Deegaanka Galmudug ee Guddigu ku dhawaaqay;
v. Ku xukunto Ururka kharashka dacwadda iyo xushmadda qareenka oo dhan **$100,000** (Boqol Kun oo Doolarka Maraykanka ah).

## F. XUDUNTA DOODDA DHINACYADA

48. Maxkamaddu markii ay deristay arjiyada dhinacyada, dhageysatayna doodaha ay maxkamadda ka horjeediyeen, waxaa u caddaatay in arrimaha xudunta u ah dooddooda ee ay tahay in laga jawaabo, lagana go'aan gaaro, ay yihiin labadan arrin:

***i. In doorashooyinka isku-sidkan ee golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka ee dowlad goboleedka Galmudug loo maamulay loona qabtay si waafaqsan mabaadi'da dastuurku u dhigay iyo hannaanka uu u dejiyay sharciga doorashooyinka dalku.***

***ii. In ay dhaceen khaladaad farsamo iyo sharci maalintii doorashada, iyo haddii ay dhaceen, in ay saamayn ku yeesheen saxnimada iyo sharcinimada natiijada doorashada.***



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
SUPREME COURT
MAXKAMADDA ... EE DALKA

## G. ASBAABTA XUKUNKA

49. In ay muhiim tahay in doorashooyinku u qabsoomaan si waafaqsan dastuurka, iyo sharciyada khuseeyo doorashooyinka, ayna waajib tahay in la ilaaliyo mabaadi'da ku xusan dastuurka iyo sharciyadaas si ay doorashadu u noqoto mid xor, xalaal iyo caddaalad ah oo horseedda xasilooni siyaasadeed ee dalka iyo nolol wanaagsan oo ay helaan dadweynaha Soomaaliyeed, labadaas arrin oo ka mid ah ujeeddooyinka ugu waaweyn ee loo dejiyay mabaadi'daas doorasho.
50. In duriddu ay ku saabsan tahay natiijada doorashooyinkii isku-sidkanaa ee golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka ee dowlad goboleedka Galmudug ee qabsoomay 30/07/2026, duriddaas oo ay saldhig u yihiin labo arrin oo kala ah:
    i. In doorashooyinku aysan waafaqsanayn mabaadi'da doorasho ee ku xusan dastuurka, iyo sharciyada khuseeyo doorashooyinka.
    ii. In ay dhaceen khaladaad iyo xadgudubyo sharci oo saameeyay saxnimada iyo sharcinimada natiijada doorashooyinka.
51. In maxkamaddu ay ka garnaqayso duridda natiijada doorashooyinka iyada oo adeegsadanyso awooddeeda dastuuriga ah ee ku xusan qodobka 130aad faqraddiisa 7aad (d) iyo qodobka 73aad ee sharciga doorashooyinka.
52. In cayimidda muddada qabsoomidda doorashooyinkii isku-sidkanas ee golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka ee dowlad goboleedka Galmudug aysan waafaqsanayn qodobka 18aad ee sharciga doorashooyinka, faqradihiisa 3aad iyo 4aad. Si waafaqsan qodobkan, taariikhda ay qabsoomayaan doorashooyinka golaha wakiillada dowlad goboleedka iyo goleyaasha deegaanka waa in la cayimaa ugu yaraan 90 maalin ka hor qabsoomidda doorashada. Muddadani waa muddada ugu yar ee ay tahay in la raaco, waana mid waajib ah oo muddo ka yar aan la cayimi karin. Guddiga waxa waajib ku ahayd in uu cayimidda taariikhda doorashooyinka u raaco sida uu qodobkani jideeyay. Arrinta uu guddigu ku dooday ee ah in 02/02/2026 uu la kulmay dhammaan ururrada siyaasadda kuna wargeliyay in ay u diyaargaroobaan qabsoomidda doorashooyinka, ma waafaqsana cayimidda sharciga ku cad, maadaama aanu jirin qoraal ay ku xusan tahay muddo cad oo ku saabsan qabsoomidda doorashooyinkaas, waxa keli ah ee uu guddigu u adeegsaday caddeynta kulankaasna uu yahay sawirro uu ku dooday in laga qaaday kulanka, taas oo aan caddeynayn nuxurka kulankaas,

haddiiba uu qabsoomay. Sidaas oo kale ma waafaqsana cayimidda sharciga ku cad, arrinta uu guddigu ku dooday ee ah in 23/02/2026 uu ku wargeliyay ururrada siyaasadda, billowga ololaha doorashada iyo soo gudbinta liiska musharraxiinta, arrimahaas oo ah kuwa uu sharcigu u dejiyay axkaam kale. Iyada oo ay sii xoojinayso in aan muddada qabsoomidda doorashooyinka loo cayimin si waafaqsan sharciga, jadwalka doorasho ee uu guddigu shaaciyay 02/07/2026, kaas oo ay ku xusan tahay muddada qabsoomidda doorashooyinka oo markaasi lagu sheegay 20/07/2026 iyada oo uu guddigu labo mar wax ka beddelay muddadaas, isaga oo ku kala cayimay 25/07/2026 iyo 30/07/2026, dhammaan muddooyinkaasina ay yihiin wax ka yar bil maalinta qabsoomidaa doorashada, taas oo si cad u baalmarsan qodobka sharciga ah ee horay ku xusan. U hoggansan la'aanta qodobka 18aad ee sharciga doorashadu, waxa ay meesha ka saaraysaa fursaddii ururradu iyo murashixiintu u heli lahaayeen in ay ugu diyaargaroobaan doorashada. waxa kale oo uu xadgudub ku yahay mabaadi'da dastuurku u dhigay doorashooyinka, sidaas oo kale waxa uu dhaawacayaa hufnaanta doorashada iyo kalsooniddi lagu qabay.

53. In muddada ololaha doorashooyinkii isku-sidkanaa ee golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka ee dowlad goboleedka Galmudug aysan waafaqsanayn qodobka 45aad ee sharciga doorashooyinka, faqraddiisa 2aad oo jidaysay in olalaha doorashada uu billaabanayo 45 maalmood ka hor maalinta loo cayimay qabsoomidda doorashooyinka, iyada oo la joojinayo 48 saac ka hor maalinta codbixinta. Warqadda ay ku qoran tahay bisha Feb 2026, ujeedkeedana lagu sheegay (Jadwalka Ololaha Doorashada Ururrada Siyaasadda ee Galmudug) ma laha wax qiima sharci ah, sababta oo ah ma waafqsana muddada ku xusan sharciga ee ah 45 maalin ee kaddib cayimidda qabsoomidda doorashada. Doodda guddiga ee ah in uu ururrada ku wargeliyay billowga olalaha doorashada 23/02/2026 waa mid aan waafaqsanayn sharciga sababta oo ah ololaha waxa uu billaabmaa marka si cad loo cayimay taariikhda qabsoomidda doorashada, taas oo aan jirin sida ku faahfaahsan tirsiga hore ee ku saabsan cayimiddaas. Ololaha doorashadu waxa uu qayb muhiim ah ka yahay geeddisocodka doorashooyinka. Waa fursadda ugu qaalisan ee ay ururrada, xisbiyadda iyo murashixiintu ku soo bandhigaan qorsheyaashooda, siyaasaddooda iyo barnaamijyada ay doonayaan in ay dalka ama deegaannadda ay u tartamayaan ku hoggaamiyaan. Ololuhu

waa fursadda ay ururrada, xisbiyadda iyo murashixiintu ku kasbadaan codbixiyeyaasha. Haddaba, sharcigu isaga oo tixgelinaya muhiimadda ololaha doorashada, waxa uu waajibiyay in ololaha doorashadu bilaabmo 45 maalin ka hor maalinta codbixinta si waafaqsan qodobka 45aad ee sharciga doorashooyiinka. Guddiga waxa waajib ku ahayd, in uu tartameyaasha siiyo fursadda uu sharcigu u siiyey, dejiyana jadwalka ololaha doorashooyinka, oo uu si siman wakhtiga ugu qaybinayo dhammaan tartameyaasha. Haddii aan fursad la siin tartameyaasha waxa ay meesha ka saaraysaa xaq sharci ah oo ay tartameyaashu leeyihiin, waxaa kale oo ay meesha ka saaraysaa, fursadihii tartameyaashu isku iibin lahaayeen, kasbashadii codbiyeyaasha iyo xaqii codbixiyeyaasha ee helitaanka qorsheyaasha iyo barnaamijyada ururrada tartamaya si ay u kala dooran karaan. Sida ku cad jawdalka doorashooyinka ee uu guddigu shaaciyay 02/07/2026 kaddibna uu labo mar wax ka beddelay, ururrada ka qaybgalay doorashada ma helin fursad ay ku ololeeyaan, arrintan oo xadgudub ku ah habraaca uu sharcigu u dejiyay hirgelinta doorashooyinka, si tabbanna u samaynaysaa saxnimada iyo sharcinimada natiijada doorashada.

54. In aanu jirin liiska codbiyeyaasha ee kumeelgaarka ah oo uu guddigu ku soo saaray muddo labo bil gudahood ah kaddib dhammaystiridda diiwaangelintooda si waafaqsan qodobka 34aad ee sharciga doorashooyinka, faqraddiisa 1aad, sababta oo ah guddigu ma samayn diiwaangelin dhammaystiran oo waafaqsan qodobkaas, iyada oo uu guddigu maxkamadda ka hor qiray in ay jirtay diiwaangelin ka socotay labo magaalo oo ka tirsan Galmudug 28/07/2026, taariikhdaas oo ah maalin un ka hor qabsoomiddii doorashada, arrintaas oo si cad u baalmarsan sharciga.

55. In aanu jirin liis codbixiyeyaal oo kamadambays ah oo uu guddigu soo saaray lana wadaagay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee xukuumadda federaalka iyo ururrada siyaasadda, 30 maalin ka hor qabsoomidda doorashada si waafaqsan qodobka 34aad ee sharciga doorashooyinka, faqraddiisa 3aad. Ma jirto wax caddeyn ah oo uu guddigu soo gudbiyay kaddib markii ay maxkamaddu u dirtay taas oo caddeynaysa in loo diray xogtaasi dhinacyada ay khusayso. Warqadda uu ku dooday guddigu in uu u gudbiyay Wasaaraddana ma aha mid waafaqsan qodobka sharciga ah ee horay ku xusan, asbaabtan darteed:

i. Warqadda kuma xusna liis magacyo codbixiyeyaal ee waa shax iyo

tirokoob guud ee codbixiyeyaasha uu guddigu sheegay in uu diiwaangeliyay.

ii. Warqaddu ma laha caddeyn qabasho oo sugaysa in ay gaadhay Wasaaradda.

iii. Waxaa iska hor imaanayo taariikhda ku xusan warqadda la sheegay in loo gudbiyay Wasaaradda 28/06/2026, iyo jadwalka uu guddigu shaaciyay 02/07/2026 oo sheegaya in liiska codbixiyeyaasha ee kumeelgaarka ah la shaacin doono 02/07/2026, halka lagu xusan in liiska kamadambeysta ah la shaacin doono 17/07/2026.

iv. In guddigu ay maxkamadda ka hor caddeeyeen in ay diiwaangelintu ka socotay labo magaalo 28/07/2026, taariikhdaas oo ah maalin un ka hor qabsoomiddii doorashada.

56. Si muwaadiniintuna ugu adeegsadaan si sahlan xaqa ay u leeyihiin in ay wax doortaan lana doorto, waa in Guddigu diiwaangeliyo muwaadiniinta xaqa u leh codbixinta, uuna diyaariyo diiwaanka codbixiyeyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan qodobka 51aad ee dastuurka, faqraddiisa 3aad. Helitaanka codbixiyeyaal si sax ah u diiwaangashan, oo xogtoodu ku kaydsan tahay xarumaha sharcigu cayimay, qof kastana og yahay goobta uu ka diiwaangashan yahay ee uu ka codaynayo, waa shardi muhiim u ah doorasho xor, xalaal iyo caddaalad ah. Iyada oo la ilaalinayo saxnaantiisa, hufnaantiisa iyo dhowrsanaanta xogtiisa, lana raacayo habraaca sharcigu u dejiyay. Haddii aan la helin codbixiyeyaal si sharci ah u diiwaangashan, ama haddii diiwaangelintu aanay raacin sharciga iyo habraacyada u dejisan, waxaa wiiqmaya hufnaanta iyo kalsoonida lagu qabi karo doorashooyinka. Arrintaasi waxa ay sidaas oo kale saamayn taban ku yeelanaysaa natiijada doorashooyinka, maadaama aan si cad loo xaqiijin karin cidda xaqa u leh codbixinta iyo habka ay codkooda u dhiibteen.

57. In aanu jirin liis musharraxiin doorasho oo ay ururrada siyaasaddu u soo gudbiyeen si waafaqsan qodobka 42aad ee sharciga doorashooyinka, faqraddiisa 1aad, taas oo waajibinaysa in liiskaasi ay soo gudbiyaan 120 maalin oo shaqo ka hor maalinta doorashada loo tartamayo. Arrintani waxa ay xadgudub cad ku tahay habraaca uu sharcigu dejiyay, waxa ayna meesha ka saaraysa ujeedkii uu sharcigu ka lahaa, waxa kale oo ay meesha ka saaraysa fursaddii lagu kala saari lahaa, laguna hubin lahaa buuxinta shuruudaha sharcigu u dhigay. Warqadaha uu Guddigu soo gudbiyay ee uu ku sheegay in ay yihiin liisaskii ay soo gudbiyeen

ururrada siyaasaddu ma ahan kuwa waafaqsan qodobka sharciga ah ee hore ku xusan, sababta oo ah: 1. Liisaskaas oo ka kooban 28, marka laga reebo 8 ka mid ah intooda kale ma laha taariikh la soo gudbiyay. 2. Dhammaan liisaskaasi marka laga reebo hal mid, intooda kale ma laha wax tixraac ah oo lagu aqoonsan karo cidda ay ka soo baxeen iyo diiwaan laga hubin karo. 3. In afar ka mid ah liisaskaasi ay yihiin kuwa ku kooban hal gole oo ah goleyaasha deegaanka, iyada oo ay doorashooyinku ahaayeen kuwo isku-sidkan oo loo tartamayay golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka ee 11 degmo. 4. Liisaskaasi kuma wada dhammaystirna dhammaan ururrada siyaasadda ee ka qeybgalay doorashooyinkaas. 5. Liisaskaasi kuma wada dhammaystirna tirada kuraasta goleyaasha loo tartamayo ee wakiillada oo ah 89 kursi, iyo deegaanka oo ah 243 kursi. 6. In aanu jirin hal urur oo soo gudbiyay liis musharaxiin gole deegaan oo dhammaystiran, ururka ugu badan ee soo gudbiyay musharraxiin gole deegaanna uu yahay JSP oo gudbiyay 237, halka ururka ku soo xiga oo ah Towfiiq uu soo gudbiyay 199. 7. In liis dhammaystiran ee musharraxiin golaha wakiillada ay soo gudbiyeen labo urur oo keli ah, kuwaas oo kale ah JSP iyo Towfiiq, marka laga reebo labadaas urur, ururka ugu dhow ee soo gudbiyay liis musharraxiin gole wakiillo waa ururka Karaama oo soo gudbiyay 40 musharrax.

58. In aanu jirin liis musharraxiin doorasho oo kamadambeys ah oo uu guddigu shaaciyay kaddib markii uu hubiyay si waafaqsan qodobka 43aad ee sharciga doorashooyinka, faqraddiisa 5aad. Warqadaha uu Guddigu soo gudbiyay ee uu ku sheegay in uu yahay liiska uu shaaciyay ma ahan mid waafaqsan qodobka sharci ee hore ku xusan, sababta oo ah: 1. Warqadahaasi kuma qorna magacyo musharraxiin ee waa tiro keli ah. 2. Warqaduhu waxa ay ku taariikheysan yihiin 29/07/2026, taas oo ah hal maalin un ka hor qabsoomiddii doorashada, halka ay ahayd in la shaaciyo ugu yaraan 100 maalin oo shaqo ka hor qabsoomidda doorashada, marka la isla akhriyo qodobbada 42aad iyo 43aad ee sharciga doorashooyinka, maadaama soo gudbinta ururradu ee liisaskaasi ay tahay 120 maalin, kaddibna Guddigu uu haysto 6 maalin oo uu ku hubinayo waafaqsaaanta musharraxiinta ee sharciga, haddii uu urur ku celiyo liis uu soo gudbiyayna, ururkaasi uu haysto 14 maalin, sidaas darteed markii 120 maalin laga jaro muddada hubinta ee uu Guddigu haysto ee ah 6 maalin oo lagu daray 14 maalin oo ah muddada ay haystaan ururradu in ay ku soo saxaan waxii ka khaldan liisaskooda, ay



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

soo harayso 100 maalin oo ah muddada ugu yar ee laga rabo Guddigu in uu ku shaaciyo liiska kamadambeysta ah ee musharraxiinta ururrada siyaasadda. 3. Email-ka uu guddigu u diray ururrada ee uu uga dalbay soo gudbinta liiska musharaxiinta doorashooyinka waxa uu ku taariikhaysan yahay 25/07/2026, halka ay ahayd in ay ka sii horreyso 120 maalin oo shaqo maalinta doorashada. Haddaba, waxa cad in la baalmaray qodobbada 42$^{aad}$ iyo 43$^{aad}$ ee sharciga doorashooyinka, doorashooyinka la galay iyada oo aanu jirin liis murashaxiin oo loo gudbiyay, la hubiyay, loona shaaciyay si waafaqsan sharciga. Arrintani waxa ay toos u taabaynaysaa, nuxurkii doorashooyinka, waayo, waa doorashooyin aan la aqoon cidda u tartamaysa. Haddiiba liiska murashixiinta loo gudbiyay guddiga maalmo yar ka hor qabsoomidda doorashada, weliba ay yihiin kuwa aan dhammaystirnayn sida tirsiga hore ku faahfaahsan, waxa ay daliil u tahay in aan dadka tartamaya laga hubin in ay yihiin dadkii xaq u lahaa tartanka doorashada ee buuxiyay shuruudaha uu sharcigu u dejiyay.

59. In aysan jirin wax is khilaafid ah oo ku jira muddada soo gudbinta musharaxiinta doorashada ee ku xusan qodobka 42$^{aad}$ ee sharciga doorashooyinka, farqaddiisa 1$^{aad}$ oo lala akhriyay qodobka 43$^{aad}$ ee isla sharcigaas, faqraddiisa 5$^{aad}$, iyo qodobka 34$^{aad}$ ee isla sharcigaas, faqradihiisa 1a$^{ad}$ iyo 3$^{aad}$. Arrinta uu ku dooday guddigu ee ah in uu jiro khilaaf u dhexeeya qodobbadaasna aysan waafaqsanayn sharciga, sababta oo ah guddiga waxaa waajib ku ah in uu dhammaystiro diiwangelinta codbixiyeyaasha kuna shaaciyo liiska kumeelgaarka ah muddo labo bil gudahood ah marka uu dhammaystiro diiwangelinta. Guddiga waxa waajib ku ah in uu dhammaystiro diiwaangelinta codbiyeyaasha inta aanu u gudbin tallaabooyinka kale ee doorashooyinka. Sidaas oo kale ma laha wax qiima sharci ah xeer-nidaamiyaha uu guddigu ku sheegay in uu wax uga beddelay muddooyinka sharciga ah ee ku xusan qodobbada 42$^{aad}$ iyo 43$^{aad}$ ee sharciga doorashooyinka, taas oo ka dhigan in uu wax ka beddelay sharciga, arrintaasna ay baxsan tahay awoodda Guddiga.

60. In aanu jirin liiska magacyada musharraxiinta ku guuleystay doorashooyinka isku-sidkan oo ay ahayd in uu guddigu shaaciyo xilligii ku dhawaaqidda natiijada si waafaqsan qodobka 70$^{aad}$ ee sharciga doorashooyinka, faqraddiisa 4$^{aad}$, faqradaas oo waajib ka dhigaysa in guddigu marka uu natiijada ku dhawaaqayo uu shaacinayo sida

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

ururradu ugu kala guuleysteen kuraasta iyo magacyada musharraxiinta ururradaas ee ku guuleystay kuraasta ururka. Guddigu waxa ay si sharciga baalmarsan u dabaqeen doorashada ku dhisan liiska xiran, taas oo ay ku doodeen in aan magacyo guuleystay la shaacinayn ee la shaacinayo sida ururradu ay ugu kala guuleysteen kuraasta, magacyada ku guuleystay kuraasta urur kastana la diyaarin doono kaddib markii ay maxkamaddu si kamadambeys ah u ansixiso natiijada doorashada, arrintaas oo si cad u u baalmarsan qodobka sharci ee hore ku xusan.

61. In aysan jirin liis codbixiyeyaal oo ku xadidan goob kasta oo codbixin sida uu guddigu ka hor qiray maxkamadda, taas oo baalmarsan habraaca doorashada, doorashadana ka dhigaysa mid sharciga baalmarsan.
62. In aanu Guddigu soo gudbin liiska natiijada goob kasta oo codbixin taas oo uu sharcigu waajibinayo in lagu dhejiyo goob kasta si waafaqsan qodobka 62aad ee sharciga doorashooyinka, faqraddiisa 1aad. Liiska goobaha uu Guddigu sheegay in natiijadooda uu dhajiyay ee uu maxkamadda u soo gudbiyay waa lix goobood oo keli ah oo ku kala yaallo Guriceel oo ah 2 goob, Masagawaay/Galcad oo ah 4 goob.
63. In tirinta codadka, ku dhawaaqista natiijada goobta, ku dhajinta natiijadda ee goobta codbixinta iyo wareejinta iyo rarista agabka doorashada, ay si toos u taabanayaan hufnaanta, daahfurnaanta doorashooyinka iyo kalsoonidda lagu qabi karo natiijadda. Si looga gaashaanto wax kasta oo wax u dhimi kara doorashada, waxaa waajib ah in arrimahan loo raaco sida ay jidaynayaan qodobada 62aad iyo 65aad ee sharciga doorashooyinka. Haddaba, arrinta uu ururku uu ku dooday ee ah in aan agabka loo wareejin, loona rarin sida sharcigu qabo guddiguna aanu si cad ugu diidin, waxa ay toos u taabanaysaa daahfuranaanta soo saarista natiijada doorashada, sababta oo ah, waxa ay luminaysaa kalsooniddii tartameyaasha maadaama aan sharciga la raacin, agabkana la raray, lana wareejiyay iyada oo aanay wakiilladda ururradu la socon.
64. In la isla adeegsaday shahaadaha diiwaangelinta codbixiyaha iyo kaarka codbixinta, taas oo uu guddigu ka hor qiray maxkamadda isaga oo ku dooday in ay ururrada qaar ka codsadeen in la oggolaado ku codeynta shahaadada diiwaangelinta codbixiyaha iyaga oo ku sababeeyay in codbixiyeyaashu aysan wada helin kaarka codbixinta, ay si cad u jebisay habraaca doorashooyinka, waxa ayna ahayd waajibaadka guddiga in uu dhammaystiro habraaca diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo bixinta kaarka codbixinta, haddii guddigu ilaalin lahaa muddooyinka

sharciga ahna aysan dhacdeen baahida uu ku sababeeyay in lagu wada codeeyo shahaadada diiwaangelinta codbiyaha iyo kaarka codbixinta.

65. In aysan waafaqsanayn sharciga, doodda guddiga ee ah in aysan jirin wax cabasho ah oo uu ururku ka gadbiyay xadgudubyada uu sheegay in ay dhaceen maalintii doorashada, sidaas darteedna aanu jirin go'aan kamadambeys ah oo uu ka cabanayo), sababta oo ah duridda uu ururku soo gudbiyay waxa ay lid ku tahay natiijada doorashooyinkii isku-sidkanaa ee golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka ee dowlad goboleedka Galmudug, natiijadaas oo ay ku dureen labo arrin oo ay nuxurkeedu saldhig u yihiin: 1. In doorashadu aysan waafaqsanayn mabaadi'da doorasho ee ku xusan dastuurka, sharciyada iyo habraacyada khuseeyo doorashooyinka. 2. In ay dhaceen khaladaad iyo xadgudubyo sharci oo saameeyay in doorashadu noqoto mid hufan, xor, xalaal iyo caddaalad ah.

66. In aysan sax ahayn, doodda guddiga ee ah in aysan markhaati geli karin xubna ka tirsan ururka sababtuna ay tahay in ay dan gaar ah ka leeyihiin) sababta oo ah qofku waxa uu noqon karaa goobjooge dhacdooyinka doorashada, waxaana xadaynaya awoodda uu u leeyahay gudashada markhaatinimada, habraaca dacwadda, heerkiisa ogaalka ee dhacdada uu ka markhaatifurayo iyo qiimaha runnimo ee la cuskan karo ee uu leeyahay markhaatifurkiisu, waxaa intaas dheer in daneeyeyaasha ku lugta leh arrimaha doorashooyinka ay ka mid yihiin kuwa ugu dhow la socoshada habraaca doorashooyinka, waxa ay maxkamadda ka hor sheegaanna ay ka mid tahay awoodda qiimaynta caddeynta ee maxkamadda.

67. In nuxurka arrimaha ay maxkamadda ka hor sheegeen markhaatiyada ay dhageysatay aysan ku jirin wax qiima sharci leh oo caddeyn ahaan loo cuskan karo, marka laga reebo arrimaha uu qiray kuna waafaqay guddigu oo kala ah: 1. In sanduuqyo ay ku jiraan codad ay yaalleen goobhihii codbixinta muddo labo maalin ah, iyaga oo ku sababeeyay duruufo amni, balse arrintaasi muujinayso gaabiska guddiga ee maamulka toosan ee doorashooyinka, taas oo dhaawacaysa hufnaanta doorashooyinka. 2. In goobaha codbixinta ee degmada dhexdeeda ah aysan ku xirnayn liis codbixin oo u gaar ah gooob kasta balse qofku uu ka codeyn karay goob kasta oo ka tirsan degmada uu joogay, arrintaas oo si cad u khilaafsan sharciga iyo mabaadi'da doorashooyinka oo waajibinaya in goob kasta oo codbixin ay ka codeyn karaan oo keli ah



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

codbixiyeyaasha ka diiwaangashan goobtaas ee uu yaallo liiskooda codbixinta, khilaafidda arintaasna ay si buuxdo u dhaawacayso hufnaanta doorashooyinka, iyada oo keenaysa in qofku uu ka codeeyo in ka badan hal goob, maadaama aysan ku xadidnayn liis codbixin oo u gaar ah goob kasta. 3. In goob codbixin oo ka tirsan degmada Caabudwaaq uu guddigu geli waayay, iyada oo ay yaalleen agabkii doorashada, isaga oo ku dooday in goobaha codbixintu ahaayeen goobo gaar loo leeyahay, balse dooddaasi ay si cad u khilaafsan tahay masuuliyadda guddiga ee ah in uu isagu maamulayo dhammaan goobaha codbixinta, in goobta asal ahaan gaar loo lahaana aysan meesha ka saaraynin masuuliyadda guddiga ee ah maamulka goobaha codbixinta doorashooyinka.

68. In aysan lahayn wax qiima sharci ah oo la cuskan karo arrimaha uu ururku caddeyn ahaan maxkamadda ugu soo bandhigay una soo gudbiyay, kuwaas oo isugu jiray sawirro, codad iyo muuqaallo uu u cuskaday jiritaanka xadgudubyo uu ku dooday in ay dhaceen maalintii doorashada, marka laga reebo arrimaha ku xusan tirsiga hore ee uu guddiguba ku waafaqay ururka.

69. Qodobka 82aad, faqradiisa 1aad, ee Sharciga Doorashooyinka waxa uu waajibinayaa in dhammaan doorashooyinka dalka heerkooda kala duwan loo qabto si waafaqsan Sharciga Doorashooyinka Qaranka, Sharciga Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda, iyo Sharciga Dhismaha Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha. Sharciyadan dhammaantood waxa saldhig u ah mabaadi'da guud ee dastuurku u dejiyay doorashooyinka dalka. Iyada oo laga duulayo mabaadi'daas, sharicgu waxa uu dejiyey hannaan jadwalaysan, fudud, qeexan, la fahmi karo, isla markaana waajib ah in lagu hago qabashada doorashooyinka. Qodobka 82aad faqraddiisa 1aad waxa uu si cad u waajibinayaa in la raaco hannaankaas.

70. Faqradda 2aad ee isla qodobkaas oo u dhigan: *"Doorasho kasta oo lagu qabto si aan waafaqsanayn hannaanka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waa waxba-kama-jiraan (null and void)."* Ujeeddada faqraddani waa in la xoojiyo u hoggaansanka sharciga iyo in si dhammaystiran loo raaco hannaanka uu sharcigu dejiyay. Waxa kale oo ay meesha ka saaraysaa marmarsiiyo kasta oo lagu hareermari karo nidaamka doorashooyinka ee sharcigu jideeyay. Sidaas darteed, doorasho kasta oo aan loo qaban si waafaqsan Sharciga Doorashooyinka, xeerarka la xiriira, iyo hannaanka uu qodobkani tilmaamay, sharci ahaan ma



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

yeelanayso jiritaan ama saameyn. Natiijadeedu waxa ay noqonaysaa mid aan ansax ahayn oo waxba kama jiraan ah. Tani waxa ay sii adkaynaysaa waajibka Guddiga ka saaran in uu tallaabo-tallaabo u raaco sharciga doorashooyinka, kuna hago dhammaan hawlaha iyo geeddi-socodka doorashooyinka dalka si waafaqsan sharciyada doorashooyinka.

71. Saameynta sharci ee ka dhalanaysa qodobkani waa in doorashooyinka ay noqonayaan waxba kama jiraan marka ay ka leexdaan hannaanka waajibka ah ee sharcigu dejiyay, gaar ahaan haddii leexashadaasi dhaawacdo hufnaanta, xornimada, xalaalnimada ama kalsoonida natiijada doorashada.

72. Qodobka 77aad ee isla Sharciga Doorashooyinka waxa uu si gaar ah uga hortagayaa in sharciga la baalmaro, waxaanu waajibinayaa dhowrista iyo ku dhaqanka sharciga doorashooyinka. Faqradda 1aad ee qodobkani waxa ay caddeynaysaa in dhowrista iyo ku dhaqanka sharcigu ay tahay waajib saaran dhammaan shacabka iyo hay'adaha ay doorashadu sida tooska ah u khusayso.

73. Faqradda 3aad ee qodobkan oo u dhigan sidan: *"Guddiga waxa waajib ku ah meelmarinta iyo ku dhaqanka Xeerkan,"* waxa ay Guddiga saareysaa mas'uuliyad gaar ah oo ka saaran hirgelinta iyo u hoggaansanka sharcigan. Sharci-dejiyuhu, isaga oo maanka ku haya in Guddigu yahay hay'adda u xilsaaran dhammaan hawlaha doorashooyinka, waxa uu si gaar ah ugu waajibiyay u hoggaansanka, dhowrista iyo dhaqangelinta sharciga doorashooyinka. Sida qodobkani caddeynayo, Guddiga waxa saaran waajib dastuuriya oo ah in qabashada doorashada si dhammaystiran loogu salleeyo mabaadi'da dastuurka iyo hannaanka sharcigu jideeyay, iyada oo la ilaalinayo halbeegyada lagu cabbiro doorasho xor iyo xalaal ah, caddaaladna ku dhisan.

74. Faqradda 2aad ee qodobkan waxa ay ku dhaqan la'aanta iyo ku xadgudubka Sharciga Doorashooyinka ka dhigaysaa dambi ciqaab lagu mutaysan karo. Taasi waxa ay muujinaysaa sida sharcigu u adkeeyay in xushmaynta iyo ku dhaqanka Sharciga Doorashooyinku yihiin waajibaad aan sinaba looga leexan karin. Sidaas awgeed, ku xadgudubka sharciga doorashooyinku ma aha oo keliya khalad habraac; marka uu saameeyo kalsoonida, xalaalnimada, ama natiijada doorashada, waxayse doorashada ka dhigaysaa mid aan ansax iyo sharci ahayn oo waxba kama jiraan ah.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

## *H.* GUNAANADKA MAXKAMADDA

75. Si waafaqsan Qodobka 130aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Maxkamadda Sare ee Federaalka, oo ah hay'adda ugu sarraysa garsoorka dalka, waxa ay u taagan tahay dhowrista sarreynta sharciga, xoojinta talinta sharciga, hubinta ku dhaqankiisa, iyo in sharciga iyo xeerarka dalka si midaysan loo dabaqo.
76. Horumarka ummadda, badqabkeeda bulsho iyo qofeedba, waxa saldhig adag u ah xushmaynta sharciga iyo ku dhaqankiisa si dhammaystiran.
77. Shacabka Soomaaliyeed, oo awoodda Alle kaddib, dastuurku siiyay bilowga iyo dhammaadka awoodda xukunka, waxa loo dammaanad qaaday helitaanka hannaan hufan, daahfuran, fudud, la fahmi karo, sharcigana ku dhisan, kaas oo ay ku dooran karaan cidda dowladnimada ku metelaysa, kulana xisaabtami karaan. Sidaas darteed, waxa ay xaq dastuuri ah u leeyihiin in dhammaan doorashooyinka hoggaankooda iyo metelayaashooda loogu maamulo, looguna qabto si waafaqsan mabda'an dastuuriga ah.
78. Doorashadu ma aha dhacdo hal mar ah; waa geeddi-socod ka bilaabma diiwaangelinta codbixiyeyaasha, diiwaangelinta ururrada iyo xisbiyada siyaasadda, ololaha iyo u diyaargarowga doorashada, codbixinta, tirinta codadka, iyo ugu dambayn soo saarista iyo ku dhawaaqista natiijada doorashada. Tallaabooyinkan, oo dhammaantood isku xidhan, waa in mid kasta loo fuliyaa sida uu sharcigu jideeyay, iyada oo laga duulayo mabaadi'da dastuurku dhigay, loona raacayo hannaanka sharciga doorashadu qeexay.
79. Doorashooyinka aan loo maamulin si hufan, daahfuran, dhexdhexaadnimo leh, dhammaan daneeyeyaashuna aanay xushmayn xeerarka lagu hagayo, shacabka iyo daneeyeyaashuna aanay dareemin in doorashadu tahay mid xor iyo xalaal ah, caddaaladna ku dhisan, waxa ay dalka u horseedi karaan qalalaase siyaasadeed iyo amni-darro sababi karta burbur iyo barakac. Waxa kale oo ay wiiqi kartaa kalsoonida iyo aaminaadda shacabku ku qabo dawladnimada iyo hannaanka doorashada.
80. Maxkamaddu waxa ay si xooggan u aaminsan tahay xaqa muwaadiniinta u leeyihiin in ay si toos ah, xor iyo xalaal ah ugu doortaan hoggaanka siyaasadeed iyo metelayaashooda. Waxa kale oo ay dhiirrigelinaysaa xaqiijinta iyo hirgelinta xaqaas aasaasiga ah ee lagu dammaanad qaaday Dastuurka Jamhuuriyadda.
81. Maxkamaddu waxa ay sidaas oo kale ku qanacsan tahay in muwaadiniinta Soomaaliyeed ay si buuxda u xaqiijin karaan xuquuqdooda dastuuriga ee ah in



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

ay wax doortaan lana doorto marka doorashadu tahay mid toos ah, qof iyo cod ah, xor iyo xalaal ah, sharcigana ku sallaysan.

82. Marka la isu geeyo waajibaadka sharci ee kor lagu faahfaahiyay iyo cilladaha dhacay, Maxkamaddu waxa ay u aragtaa in khaladaadku aysan ahayn kuwo farsamo oo keliya, balse ay yihiin cillado taabanaya mabaadi'da dastuurku dhigay iyo sharciyadda doorashada u degsan oo aan si fudud loo sixi karin kuwaas oo si toos ah u taabtay hufnaanta geeddi-socodka, xornimada doorashada, iyo kalsoonida natiijada. Sidaas darteed, gefefka dastuur iyo sharci ee dhacay, waxa ay si toos ah u saameeyeen ansaxnidda dooorashooyinka, waxa ay doorashooyinka ka dhigayaan kuwa aan u dhicin sifo sharci ah oo waxba kama jiraan ah.

## I. GO'AANNADA MAXKAMADDA

Iyada oo tixraacaysa sababaha iyo qodobbada kor lagu faahfaahiyay, Maxkamaddu waxa ay soo saartay go'aannadan:

1. Iyada oo lagu salleynayo Qodobka 82^aad ee Sharciga Doorashooyinka iyo mabaadi'da dastuuriga ah ee doorasho xor, xalaal iyo caddaalad ah, Maxkamaddu waxa ay go'aamisay in doorashadii isku-sidkanayd ee golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka, ee 30 luulyo 2026 ka dhacday dowlad goboleedka Galmudug, aan loo maamulin loona qaban si waafaqsan dastuurka iyo sharciga doorashooyinka dalka; sidaas darteedna natiijadeedu ay tahay mid aan ansax ahayn oo waxba kama jiraan ah.
2. Iyada oo lagu salleynayo Qodobka 77^aad ee Sharciga Doorashooyinka iyo waajibka Guddiga ka saaran meelmarinta iyo ku dhaqanka sharciga, Maxkamaddu waxa ay go'aamisay in khaladaadkii dhacay ay ahaayeen kuwo aan la sixi karin, isla markaana dhaawac weyn u geystay hufnaanta, xornimada iyo xalaalnimada doorashooyinka, saamayn tabanna ku yeeshay natiijadooda.
3. Iyada oo la ilaalinayo xaqa muwaadiniintu u leeyihiin doorashooyin toos ah, xor xalaal iyo cadaalad ah, isla markaana la fulinayo waajibaadka sharci ee ku xusan Sharciga Doorashooyinka, Maxkamaddu waxa ay amartay Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha in uu ku qabto waqtiga ugu dhow ee macquulka ah doorashooyinka golaha wakiillada iyo goleyaasha deegaanka ee dowlad goboleedka Galmudug, isaga oo si dhammaystiran u raacaya dastuurka dalka, sharciga doorashooyinka, sharciga dhismaha guddiga, iyo xeerka ururrada iyo xisbiyada siyaasadda.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية

4. Iyada oo la tixgelinayo danta guud, joogtaynta adeegga dowladnimo, iyo ka hortagga firaaq maamul oo dhaawici kara adeegyada iyo xasilloonida dowlad goboleedka Galmudug, Maxkamaddu waxa ay amartay in hay'adaha hadda jira ay sii hayaan xilka inta ay ka beddelayaan kuwa ku yimaada doorasho cusub oo loo qabtay si waafaqsan sharciga.
5. Iyada oo la tixgelinayo mabda'a caddaaladda guud iyo duruufaha dacwaddan doorasho ee taabanaysa danta guud, Maxkamaddu waxa ay go'aamisay in dhinac kastaa uu qaato kharashka dacwadda ee uu galay.

Xukunkan waxa lagu soo saaray Muqdisho 24/08/2026.

**Xubnaha Maxkamadda Sare ee Federaalka ee Dacwadda**

| | |
|---|---|
| **Baashe Yuusuf Axmed**<br>**Guddoomiye** | **Saalax Sh. Ibraahim Dhiblaawe**<br>**Garsoore** |
| **Cabdulxaq Cumar Maxamed**<br>**Garsoore** | **Cabdulcasiis Maxamed Yuusuf**<br>**Garsoore** |
| **Xaydar Barqash Abiikar**<br>**Garsoore** | **Maxamed Faarax Jimcaale**<br>**Kaaliye** |

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية
المحكمة العليا
SUPREME COURT
MAXKAMADDA SARE EE DALKA